Imperial College Healthcare NHS Trust

Adeegyada daawaynta kelyaha iyo beerista

# Beerista ganacaaga Macluumaad loogu talagalay bukaannada, qaraabada, iyo daryeelayaasha

## Waa maxay qalliinka beerista ganaca?

Qalliinka beerista ganaca waa qalliinka weyn oo lagu geliyo ama lagu beero ganac caafimaad qaba ganacaas oo laga bixiyay
qof dhintay, loona galiyo qof ganaciisu uusan si sax ah u shaqaynayn.

Ganacaagu waa xubin ku taalla dhabarka qaybta hoose ee calooshaada (sawirka 1). Mid ka mid ah mid ka mid ah hawlihiisa ugu muhiimsan waa soo saarista insuliin, taas oo ah hormoon maamula nuugista sonkorta (gulukoos)
si ay u gasho unugyadaada.

Mararka qaarkood ganacaagu ma soo saaro insulin ku filan, ama jidhkaagu ma awoodo inuu si fiican u isticmaalo
insuliinka ganacaagu soo saaro. Taas awgeed heerarka sonkorta dhiigga ayaa kor u kici kara
ilaa heerar aan caafimaad ahaan wanaagsanayn, taas oo keeni karta cudurka sonkorowga.

## Maxay tahay shaqada qalliinka beerista ganaca?

Ganaca la beeray oo si fiican u shaqaynaya wuxuu uga jawaabaa heerarka sonkorta dhiiggaaga isagoo soo saaraya heerka insuliinta saxda ah
si heerarka sonkorta dhiigga loogu hayo oo uusan u dhaafin xadka caadiga ah ee loogu talagalay. Taas macnaheedu waa inaadan u baahnayn
inaad maalin walba isku durto insuliin. Si kastaba ha ahaatee, faa'iidada ugu weyn ee adiga kuugu sugan
waa in noloshaadu dheeraato oo aad u hesho kelyo la beeray oo si fiican kuugu shaqeyo muddo dheer.




Sawirka 1: Meesha jidh ahaan uu ku yaallo ganacaaga.

## Yaa mari karo ama gali karo qalliinka beerista ganaca?

Si aad u marto beerista ganaca, waa inaad:

- qabta sonkorowga lagu daweeyo insuliinta
- la kulamyso dhibaatooyin waaweyn oo ka dhashay sonkorowgaaga
- jidh ahaan u awooddaa inaad marto qalliinka weyn

## Maxay yihiin faa'iidooyinka maritaanka beerista ganaca?

- beerista ganaca wuxuu u horseedaa nolol dheer oo tayo wanaagsan leh dadka badankood ee heli karo inay maraan beerista ganaca
- sonkorta dhiiggaaga waa in si fiican loo xakameeyaa oo uma badna inaad u baahato insulin
- dhaawaca uu sababay sonkorowga waa inuu hoos u dhaco
- haddii aad qorsheyneyso inaad carruur dhasho, waxaa suurtagal ah inaad isku daydo inaad dhasho ilmo marka aad bogsato

## Waa maxay noocyada beerista ganaca ee aan sameyno?

Waxaan ku sameynaa saddex nooc oo beerista ganaca ah Imperial College Healthcare:

**Qalliinka isku-darka beerista ganaca iyo kelyaha (SPK)**
Beerista wadajir ah ee ganaca iyo kelyaha. Waa nooca ugu badan ee beerista ganaca, wuxuuna ku habboon yahay bukaanada insuliinta isticmaala kuwaas oo ay kelyahoodu dhibaato leeyihiin.

**Beerista ganaca kadib marka la sameeyo beerista kelyaha (PAK)**
Haddii aad hore u martay beerista kelyaha taas oo si fiican u shaqaynaysa, isla markaana lagugu qiimeeyo inay kuu fiican tahay inaad ku faa'iidi karto beerista ganaca, waxaa lagugu samayn doonaa qalliinka beerista ganaca oo gooni ah (PAK).

**Qalliinka beerista ganaca keliya (PTA)**
Haddii aad la ildaran tahay dhibaatooyin soo noqnoqda ama halis weyn ku ah nolosha oo ka dhasha jidhkaaga oo aan si fiican uga jawaabin sonkorta dhiigga hooseeysa (hypoglycaemia), waxaad mari doonta qalliinka beerista ganaca keliya (PTA).

Xulashooyinka kale ee lagu badali karo beerista ganaca waxaa ka mid ah:

**Daaweynta insuliinta iyo beerista kelyaha**
Haddii aad sii wado qaadashada insulin isla markaana aad qorsheyneyso beerista kelyaha, waxay hagaajin kartaa shaqada kelyahaaga, laakiin weli waxaad u baahan doontaa oo aad ku tiirsanaan doonta insuliin.

**Beerista unugyada islet-ka iyo beerista kelyaha**
Unugyada islet-ka waa unugyo ku jira ganaca kuwaas oo soo saara insuulin. Unugyada islet-ka waa la beeri karaa, marka ay bilaabaan inay shaqeeyaan, waxay kordhin karaan soo saarista insuliinta iyo xakameynta sonkorowga. Tani waxaa la samayn karaa isla waqtiga la sameynaayo beerista kelyaha.

## Halkee laga helaa ganacyada ay dadka kale leeyihiin?

In kasta oo ay suurtagal tahay in qof nool uu qayb ganaciisa kamid ah ugu deeqo qof kale, dhammaan beerista ganaca ee laga sameeeyo
boqortooyada Ingiriiska waxaa laga helaa deeq-bixiyeyaal (dhintay).

## Imisa ayay igu qaadan doontaa inaan sugo beerista?

Marka aan hubinno in aad ku habboon tahay beerista ganaca, waxaan ku dari doonnaa liiska sugitaanka qaranka. Waqtiga sugitaanka beerista wuxuu ku xiran yahay kooxda dhiiggaaga, nooca nudaha, iyo unugyada difaaca jirka ee dhiiggaaga ku jira. Celceliska waqtiga sugitaanka beerista ganaca waa 1 sano.

Haddii aad aaminsan tahay in organka laguu soo bandhigay uu leeyahay halis aad u sareysa oo uu si fiican u shaqeyn karin ama leeyahay dhibaatooyin kale oo halis ah, waxaad xaq u leedahay inaad diido organkan oo aad ku sii sugto liiska sugitaanka ilaa organ kale oo kugu habboon uu diyaar ka noqdo. Haddii aad raeynayso inaad aqbasho ganaca cillad halis sare leh qaba, sida ganac laga bixiyay deeq-bixiyeyaasha qaba cuduro ama infekshanno aad u daran, waxaa suurtagal ah in waqtiga sugitaanka uu gaaban yahay. Mararka qaar, waxaa lagu soo wici karaa inaad timaaddo si laguu sameeyo beerista, laakiin beeristu ma dhici karto sababtoo ah organka deeq-bixiyaha laga helay laga yaabo inuusan ku habboonayn ama uusan ammaan u ahayn in la isticmaalo. Kooxdayada ka howl gasha howlaha beerista waxay sidoo kale diidi karaan dalabka haddii ay dareemaan in organka uusan kugu habboonayn adiga.

Waxaad ka heli kartaa macluumaad dheeraad ah bogga NHS Blood and Transplant ee bartiisu tahay (nhsbt.nhs.uk) bogga internetka: www.nhsbt.nhs.uk/organ-transplantation/pancreas/receiving-a-pancreas/how-long-is-the-wait-for-a-pancreas/

## Maxaa dhacaya inta aan ku jiro liiska sugitaanka?

**Hubi in kooxda tallaalka ay ogyihiin sida ay kula soo xiriiri karaan mar walba.**

Marka uu diyaar noqodo ganaca deeq-bixiyaha, waa in si dhakhso ah loogu sameeyaa beerista, sida ugu fiican waa in lagu sameeyo 12 saacadood gudahood. Waa inaad diyaarisaa boorso ay ku jiraan dhammaan waxyaabaha aad u baahan doonto inta aad ku sugan tahay isbitaalka, isla markaana hubi inaad qorshe ka samaysatay sida aad ku tagi lahayd xarunta beerista xilli hore.

## Maxaa dhaca marka la iga codsado inaan imaado isbitaalka si beerista loo sameeyo?

Marka uu diyaar noqodo organkan lagu galin karo adiga, dhakhtarka kelyaha ayaa ku soo wici doona. Waxaan kaa codsan doonnaa inaad timaadid waarka Handfield Jones ee Isbitaalka Hammersmith. Waxaan ku siin doonnaa tilmaamo ku saabsan waxa aad cuni karto iyo waxa aad cabbi karto si aad si habboon ugu diyaar garowdo qalliinka.

**Waqtigu aad ayuu muhiim u yahay inta lagu jiro tallaalka si loo hubiyo in xubnuhu ay caafimaad qabaan oo ay si habboon u shaqeeyaan. Aad bay muhiim u tahay inaan kula soo xiriiri karno wakhti kasta, oo ay ku jirto habeenkii. Tani waa waqtiga ay orgaano badan noqdaan kuwo la heli karo. Marka aad hesho wicitaanka, waa inaad sida ugu dhakhsaha badan u timaaddaa isbitaalka, adigoo isticmaalaya gaadiidkaaga haddii ay suurtagal tahay.**

Haddii aan ku heli karin oo aan kula soo xiriiri karin muddo kooban gudahood, orgaanada waxaa loo bandhigi karaa bukaan kale.
Nasiib darro, waxaa sidoo kale suurtagal ah in xitaa marka laguu woco,
qalliinka beerista aysan u dhici karin sababo kala duwan awgood, badanaa cillado la xiriira deeq-bixiyaha ama cillado la xiriira
ganaca laftiisa. Kooxda beerista waxay mar walba ku siin doontaa warbixin ku saabsan xaaladdaada.

## Maxaa dhaca inta lagu jiro qalliinka?

-  qalliinka beerista ganaca laftiisa wuxuu qaataa 2 ilaa 4 saacadood
-  qalliinka isku-darka beerista ganaca iyo kelyaha (SPK) wuxuu qaataa 6 ilaa 8 saacadood ama ka badan
-  inta beerista lagu sameynayo, waxaa lagu seexin doonaa iyada oo lagu suuxinaayo suuxdinta caadiga ah inta ay howshu socoto

Inta badan, ganaca deeq-bixiyaha waxaa lagu beera calooshaada (uurka caloosha). Ganacaaga looma baahna in laga saaro. Ganaca deeq-bixiyaha waxaa lala beera
qayb yar oo xiidmaha yar ee deeq-bixiyaha ah (laba iyo tobanlaha ama duodenum-ka).Tan waxaa lagu xiraa xiidmahaaga yar ama
mararka qaarkood kaadiheystaada. Xididdada dhiigga ee u dhow calooshaada ayaa la heli doonaa, kadibna
isku xidh ayaa laga samayn doonaa xididdada dhiigga ee ganaca iyo xididdadaada dhiigga. Marka xididdada dhiigga la isku tolo, dhiiggu ayaa loo oggolaan doonaa inuu ku qulqulo ganaca. Haddii dhakhtarka qalliinka uu ku qanco sida qulqulka dhiiggu u socdo, markaas ayuu sameyn doonaa isku xidhid u dhexeeya qaybta
mindhicirka ee ku xiran ganaca la deeqay iyo mindhicirkaaga.

## Maxaa dhici doona qalliinka ka dib?

Qalliinka ka dib, oo lagu sameeyo Isbitaalka Hammersmith gudaha qolalka qalliinka waaweyn, waxaan ku wareejin doonaa qaybta soo kabashada halkaas oo aan kuula socon doono muddo hal ilaa laba saacadood ah. Inta aad ku jirto
qaybta soo kabashada, waxaa lagu sameyn doonaa iskaan baadhitaan oo lagu baadhaayo qaybaha gudaha jirka ee qallinka lagu sameeyay. Waxaan u baahanahay baaritaanka iskaanka si aan u qiimeyno qulqulka dhiigga ee
soo galaya iyo dhiiga ka baxaayo organka (orgaanada) cusub

Marka dhakhaatiirta beerka iyo kelyaha ay ku qancaan in xaaladdaadu ay wanaagsan tahay, waxaa laguu wareejin doonaa Qaybta Daaweynta Degdegga ah (ITU). Marka aad si buuxda uga soo kacdo suuxdinta caadiga ah ee lagugu sameeyay, waxaad ogaan doontaa inay kugu xiran yihiin dhowr tuubooyin, mashiinada kormeeraya xaaladaada caafimaad iyo
mashiinno.

Waxa ku jiri kara:

-  **mashiinka PCA:** kaas oo ah mashiin leh tuubo taas oo daawo xanuun baabi'iye ah jirkaaga gaarsiisa oo
 waxaana lagu xakameynayaa qalab gacanta lagu qaato oo aad xakamayn karto. Si tartiib tartiib ah ayaa lagaaga saari doonaa
 maalmaha ugu horreeya qalliinka ka dib
-  **qalab ogsijiin**: si uu kaaga caawiyo neefsashadaada 24 ilaa 48 saacadood ka dib qalliinka.
-  **kanula (tuubooyin xididka la geliyo):** waa tuubooyin siiya nafaqooyinka (qaybta waxtarka leh ee cuntada) iyo dareere si toos ah xididdadaada aroorka.
-  **Tuubada sanka–caloosha (NG):** waa tuubo caag ah oo sanka laga geliyo ila calooshaada gaarta
 si caloosha looga dhigo mid madhan ilaa shaqada caadiga ah ee mindhicirkaadu soo laabato, isla markaana si loo ilaaliyo aaga
 ganaca cusub uu kaga xiran yahay mindhicirkaaga yar
-  **tuubooyin lagu soo saaro dareeraha:** waa tuubooyin caag ah oo la dhigaa si dhiigga iyo dareerayaasha kale looga saaro
 gaybta qalliinka
-  **tuubada kaateetarka kaadida lagu soo qaado:** waa tuubo la geliyo kaadi-haystaada oo kuu oggolaanaysa inaad kaadiso adigoon musqusha aadin
 (tuubada kaadi so saarista), isla markaana lagu kormeero kaadidaada haddii
 qalliinka beerista kelyaha la sameynayo isla waqtigaas
-  **tuubada taageerada:** waa tuubo gudaha ku jirta oo u dhexeysa kaadi-haystaada iyo kelyahaaga la beeray (qalliinka beerista
 ganaca iyo kelyo isku marka ah) oo loo yaqaano ‘tuubada taageerada' si loo ilaaliyo isku-xidhka kaadi-haystaada–
 tani waxaa lagaaga saari doonaa iyada oo la sameeynaayo hab-qalliin oo gaaban 3 toddobaad ka

dib marka beerista la sameeyo. Waxaan ka codsan doonaa inaad tagto Qaybta Pam Sassoon (PIU) ee Isbitaalka Hammersmith si tuubada taageerada lagaa saaro adigoo si caadi ah lagu suuxinayo adiga oo xarunta u joogayo bukaan hal maalin joog ah, waxaana suuragal ah inaad isla maalintaas gurigaaga ku noqoto.

Inta aad isbitaalka ku jirto, waxaa laguu sameyn doonaa baaritaanno iskaan oo lagu baadhaayo qaybaha gudaha iyo/ama iskaanka CT oo lagu eegayo ganacaaga cusub. Baaritaannadani waxay si gaar ah u eegayaan qulqulka dhiigga ee ganacaaga cusub (iyo kelyaha, haddii loo baahdo) waxayna muujin doonaan haddii ay jidhaan cidhiidhi ama xannibaad ku dhaca xididdada dhiigga, ama dhiig ama dareere aan caadi ahayn oo ku ururay agagaarka orgaanada la beeray.

## Intee in le'eg ayaan isbitaalka ku jiri doonaa?

Muddada celceliska ah ee isbitaalka la joogo ka dib qalliinka beerista waa qiyaastii laba toddobaad. Tani way ku kala duwanaan kartaa iyadoo ku xiran sida aad dareemayso iyo haddii baaritaanno dheeraad ah ama hab-qalliimo dheeraad ah loo baahan yahay.

## Ma u baahanahay ballan dabagal ah?

La socodka joogtada ah ee ay waheliso ballanta dabagalka ah aad ayey muhiim u tahay. Kooxda qalliinka beerista waxay ku siin doonaan jadwalka baaritaannada ee adiga kugu habboon. Laakiin u diyaar garow inaad ku soo noqoto rugta caafimaadka laba ama saddex jeer usbuucii labada toddobaad ee ugu horreeya.

## Ku noqoshada shaqooyinka

Waxay inta badan ku xiran tahay shaqada organka la beeray iyo sida uu jirkaagu u la qabsado daawooyinka cusub.

- haddii aad shaqaynaysay ka hor qalliinka beerista, badanaa waad ku laaban kartaa shaqada inta u dhexeysa 10 ilaa 12 toddobaad qalliinka ka dib, haddii ay tahay shaqadu tahay shaqo gacanta laga qabto, waxay qaadan kartaa waqti intaas ka dheer
- caadi ahaan waxaad gaari wadi kartaa 4 toddobaad ka dib
- bukaannada badankood waxay u safri karaan dibadda 12 bilood ka dib
- waxaan kugu dhiirigelinaynaa inaad sameyso jimicsi dhexdhexaad ah ku sameyso guriga oo aad sii wadato samaynta jimicsigan iyadoo si tartiib tartiib ah loo kordhinayo toddobaadyo kadib

## Waa maxay khataraha ka dhalan kara qalliinka?

Qalliinka beerista ganaca ayaa leh khatar dhibaatooyin ah oo dhici kara inta lagu jiro ama ka dib qalliinka beerista. Khataraha waxaa kamid ah kuwan soo socda:

### Dhiigbax

Sida caadiga ah qalliin kasta, waxaa jira khatar dhiigbax ah. 100 kii bukaanba, inta u dhaxaysa 30 ilaa 50 ayaa u baahan doona in dhiig lagu shubo toddobaadka ugu horreeya qalliinka gudihii. Bukaannada qaata daawo joojisa xinjirowga dhiigga (tusaale, warfarin) waxay leeyihiin khatar sare oo ay kula kulmi karaan dhiig-bax ah.

### Caabuqa

Inta u dhaxaysa 10 ilaa 20 bukaan 100 kii bukaanba ayaa u baahan doona antibiyootik sabab la xiriirta caabuq toddobaadka ugu horreeya ee qalliinka beerista ganaca. Caabuqyada waa kuwo caadi ah ka dib beerista ganaca, qayb ahaan sababtoo ah waxaa laguu siin doonaa daawooyin hoos u dhiga difaaca jirka. Daawooyinkani waxay yareeyaan khatarta in jirkaagu diido ganaca la deeqay ee lagu beeray, laakiin sidoo kale waxay hoos u dhigaan awoodda difaaca jirkaaga ee la dagaallanka caabuqyada.

### Dhiig-xinjirowga (Thrombosis)

Waxaa jirta khatar ah in xinjirowga dhiig uu ku sameysmo gudaha xididdada ganaca la beeray. Tani waxaa loo yaqaannaa
xinjirowga dhiigga (thrombosis) waxayna ku dhici kartaa 10 boqolkii bukaanba (10 ka mid ah 100). Tani badanaa waxay dhacdaa inta lagu jiro toddobaadka ugu horreeya ka dib
beerista, waxaana laga yaabaa inay sababto in organka la saaro. Waxaa si dhow laguu kormeeri doonaa
calaamadaha xinjirowga dhiigga inta aad isbitaalka ku jirto iyo marka aad guriga ku laabato. Waxaan qaadi doonnaa baarista muunada dhiiga
oo joogto ah. Waxaa lagu sameyn doonaa baaritaano gaar ah oo xinjirowga dhiigga ah si loo cabbiro sida dhiiggaagu u xinjirowayo, si
loo dheellitiro khatarta xinjirowga dhiig samaysma iyo khatarta dhiig-baxa.

**Qalliinno dheeraad ah**

Cilladaha keena in la sameeyo qalliinno dheeraad ah waxaa kamid noqon kara in beerista orgaanka la beeray aysan shaqaynin, mindhicirka oo xirma, dheecano in ay ku ururaan aaga ganaca, caabuqyada nabarka, dhiig-bax, iyo dhaawacyo ku dhaca xubno kale oo jirka ka mid ah.

**Diidmada organka la beeray ganaca (ama kalyaha)**

Diidmada organka la beeray waxay badanaa ku dhacdaa inta u dhexeysa 10 ilaa 15 bukaan 100 kii bukaanba sannadka ugu horreeya ka dib beerista. Diidmada waa marka nidaamka difaaca jirkaagu uu bilaabo inuu ‘weeraro' ganaca la beeray (ama kelida).Tani badanaa waa la daaweyn karaa. Waxaan ogaan karnaa iyadoo la adeegsanayo baaritaanno dhiig gaar ah si loo baaro unugyada difaaca, sawir-qaadista CT, iyo daraasadda muunad nude laga soo qaatay ganaca la beeray. Haddii aan xaqiijino inuu jiro diidmo, daaweyntu waxay ku xiran tahay nooca diidmada oo ay ku jiraan steroids, immunoglobulins ama kordhinta garoojada xakamaynta difaaca jirka.

**Dhibaatooyinka kale**

Khataraha guud waxay la mid yihiin kuwa ka dhasha nooc kasta oo qalliinka weyn ee caloosha ah, waxaana ka mid ah caabuqa nabarka, caabuq ka dhaca gudaha caloosha, dhibaatooyinka (wadnaha), xinjirowga dhiigga ee xididdada qoto dheer ee lugaha (xinjirowga dhiigga ee lugaha), iyo xinjirowga dhiigga ee u gudba sambabada (xinjirowga dhiigga ee u gudba sambabada).

Khataraha muddada-dheer waxaa ka mid ah caabuqyada, diidmada ganaca la beeray, daloolka derbiga caloosha (hernia), daciifnimada xididdada dhiigga ee ganaca la beeray, iyo dhibaatooyinka ka dhasha daawooyinka hoos u dhiga difaaca jirka ee muddo-dheer la qaato.

## Daawooyinkee ayaan u baahanahay inaan qaato?

Si loo ilaaliyo ganaca la beeray (iyo kalyaha, haddii sidoo kale la beeray) ka diidmada nidaamkaaga difaaca jirka, waxaa lagaa rabaa inaad qaadato daawooyin awood leh oo hoos u dhigaya difaaca jirka.

Garoojada daawooyinka difaaca jirka hoos u dhigaya ayaa si tartiib tartiib ah loo dhimi doonaa ka dib beerista. Haddii aad joojiso qaadashada daawooyinka difaaca jirka hoos u dhigaya, ganacaaga cusub (iyo kelyahaaga, haddii lagu tallaalo) wuu joojin doonaa shaqada jirkaaguna wuu diidi doonaa.

Qalliinka ka dib, waxaad heli doontaa daaweyn laguu daaweeyo daawo loo yaqaan alemtuzumab (Campath).
Daawadani waxay yaraysaa awoodda nidaamkaaga difaaca jirka ee ka hortagga organkaaga la beeray. Kadib waxaa daba soconi doona oo la samayn doonaa daaweyn muddo-dheer ah, badanaa iyadoo la isticmaalo isku-darka laba nooc oo kiniin ah, kuwaas oo ah Tacrolimus (Adoport) iyo Mycophenolate mofetil (MMF).

## Dhibaatooyinka ka dhasha daawooyinka hoos u dhiga difaaca jirka

Maalmaha ugu horreeya ka dib beerista, qalliinka iyo daawooyinka hoos u dhiga difaaca jirka waxay ka dhigaan jirkaaga mid u nugul caabuqyo kala duwan, sida kuwa laabta iyo kaadi-mareenka. Waxaan ku siin doonnaa antibiyootiko iyo daawooyinka ka hortagga fayraska si looga hortago loona daweeyo caabuq kasta oo jira.

Daawooyinka hoos u dhiga difaaca jirka ee muddo-dheer ee la qaato waxay sidoo kale kordhin karaan khatarta ah inay kugu dhacaan noocyo qaar oo kansar ah, gaar ahaan kuwa la xiriira maqaarka ama qanjidhada dhiigga (lymphoma). Waxaan si dhow ula socon doonnaa calaamadaha kansarkan ka dib beerista maadaama inta badan si wax ku ool ah loo daaweyn karo haddii waqti hore loo ogaado. Waxaa sidoo kale laguu siin doonaa talooyin ku saabsan daryeelka maqaarka, oo ay ku jirto ka ilaalinta maqaarka qorraxda.
Waxaa laga yaabaa inaan ku siino steroids haddii aan ka walwalno in jirkaagu diido daawada ama u dulqaadan waayo.

## Maxay yihiin faa'iidooyinka maritaanka beerista ganaca?

- beerista ganaca waxay dadka badankooda u keentaa nolol dheer, oo caafimaad iyo tayo fiican leh
- muddada dheer, sidoo kale waxay yarayn kartaa khatarta dhimashada ka dhalata xanuunnada wadnaha iyo xididdada dhiigga, waxayna suurtogal ka dhigi kartaa dib u soo kabashada dhaawacyada dib loo rogi karo ee xubnaha, kuwaasoo inta badan sii xumaada 6 ilaa 12 bilood ee ugu horreeya ka dib beerista, kadibna hagaaga)
- sonkorta dhiiggaaga waa in si fiican loo xakameeyaa oo uma badna inaad u baahato insulin
- dhaawaca uu sababay sonkorowga waa inuu hoos u dhaco
- haddii aad qorsheyneyso inaad carruur dhasho, waxaa suurtagal ah inaad isku daydo inaad dhasho ilmo marka aad bogsato
- haddii qalliinka la sameeyay uu yahay beerista ganaca iyo kalyaha oo isku mar ah, sidoo kale waa la filan karaa in ay kalyaha noqdaan kuwa shaqeya – tani waxay ka micno noqoni karta in kelidu shaqayn karto iyada oo ka madax-bannaan insulinta iyo dhaqitaanka sifaynta kelyaha

## Maxaa ku dhaca sonkorowga ka dib beerista ganaca?

Beerista ganaca waxay hagaajin kartaa soo saarista insulin isla markaana dib u soo celin kartaa heerarka caadiga ah ee sonkorta dhiigga.
Mararka qaarkood waxaa laga yaabaa inaad u baahato inaad insulin sii qaadato muddo ilaa ganacala beeray uu ka bilaawo inuu shaqeeyo. Waxaa sidoo kale suurtogal ah in garoojada insulin la dhimo haddii beerista ganaca ay shaqaynayso si qayb ah, ilaa ganacaaga la beeray uu si buuxda uga shaqeynayo mar kale. Haddii ganaca la beeray uusan shaqayn, waxaa laga yaabaa inaad sii wado qaadashada insulin. Mararka qaarkood, ka dib beerista ganaca, heerarka sonkorta dhiigga ayaa si hoose u dhici kara (hypoglycaemia) – haddii ay tani dhacdo, waa in lagu wargeliya kooxda qalliinka.

## Maxaa dhaca haddii beerista ganaca ay fashilanto?

Haddii ganacaaga cusub uu fashilmo oo uusan u shaqaynin sidii la rabay, waxaad dib u bilaabi kartaa qaadashada daaweynta insulin mar kale isla markaana waxaad tixgelin kartaa beeris labaad Go'aankan wuxuu ku xirnaan doonaa xaaladdaada caafimaad ee hadda, awooddaada aad ugu adkeysan karto qalliinka, iyo rajadaada ku saabsan ilaalinta heer nololeed gaar ah.

Waxaad wax badan oo ku saabsan beerista ganaca ka akhrisan kartaa bogga intarnetka NHS Blood and Transplant ee bartiisu tahay
www.nhsbt.nhs.uk/organ-transplantation/pancreas/

## Halkeen ka heli karaa macluumaad dheeraad ah?

Waxaad ku heli karta macluumaadka buug-yarahan oo ku qoran **luqado kale** halkan:

- www.imperial.nhs.uk/kidneyandpancreastransplantation (guji 'Patient information (macluumaadka bukaanka)')
- www.kidneycareuk.org/kidney-disease-information/treatments/transplantation/simultaneous-pancreas-and-kidney-transplantation/ (guji 'Gelitaanka iyo taageerada luqadaha' si aad u hesho macluumaadka oo ku

qoran luqado kale iyo qoraalka oo
cod lagu akhrinaayo)

Guji guja-raacan si aad isu diiwaangeliso oo u eegto diiwaannadaada caafimaad.
https://www.imperial.nhs.uk/patients-and-visitors/patient-information/my-health-records

## Nala soo xiriir

- Qaybta Qiimeynta Kalyaha (Renal Assessment Unit – RAU) – 020 3313 6604
- Handfield Jones ward - 020 3313 6676 / 020 3313 6674
- Qaybta Pam Sassoa (Pam Sassoa Unit – PIU) – 020 3313 6683

## Sideen uga faalloodaa booqashadayda?

Waxaan hiigsaneynaa inaan bixino adeegga ugu wanaagsan ee suurtogalka ah, shaqaaluhuna waxay ku farxi doonaan inay ka jawaabaan
su'aalaha aad qabtid. Haddii aad hayso wax **talooyin** ama **faallooyin** ku saabsan booqashadaada**,** fadlan
la hadal xubin ka mid ah shaqaalaha ama la xidhiidh la taliyaha bukaanka iyo adeega xidhiidhka **(PALS**) lambarka
**020 3312 7777** (10.00 - 16.00, Isniin ilaa Jimce). Sidoo kale waxaad iimayl ugu diri kartaa PALS imperial.pals@nhs.net Kooxda PALS waxay dhageysan doontaa welwelkaaga, talooyinkaaga ama su'aalahaaga oo
waxayna badanaa awoodaan inay ku caawiyaan xalinta dhibaatooyinka adiga kuu khuseeya.

Haddii kale, waxaad dooran kartaa inaad cabasho gudbiso adigoo la xiriiraya waaxdeena cabashooyinka.

Waaxda Cabashooyinka, fourth floor, Salton House, St Mary's Hospital, Praed Street London W2 1NY

Imayl: ICHC-tr.Complaints@nhs.net

Telefoon: **020 3312 1337 / 1349**

## Qaabab kale ee lagu heli karo

Buug-yarahan ayaa la heli karaa marka la codsado isaga oo lagu daabacay far weyn ama far si fudud loo akhriyi karo, cod ahaan,
Farta Indhoolaha, ama isaga oo ku qoran luqado kale oo beddel ah. Fadlan iimayl u dir kooxda isgaarsiinta adiga oo isticmaalaya:
imperial.communications@nhs.net

## Wi-fi

Wi-fi ayaa laga heli karaa xarunteena caafimaad. Wixii macluumaad dheeraad ah booqo boggayaga internetka ay bartiisu tahay: www.imperial.nhs.uk

Adeegyada cudurrada kelyaha iyo beerista
Waxaa la daabacay: Noofambar 2025
Taariikhda dib u eegista Noofambar 2028
Lambarka Tixraaca: 942
© Imperial College Healthcare NHS Trust